

Shuruucda

Shuruucda guud

Qaybtayada guriga dabaqa, aagaga guud iyo aagaga dibada dhammaan waa n ay ahaadaan nolol nadiif iyo nabad qab ah oo waafaqsan sharciyada guud (booliska, iyo daryeelka caafimaad).

Taa ka sakow, shuruucda guud ee soo socota waa in la raaca:

a) Shuruucda guud

1. Codadka dhibaata leh, tusaale mishiin qaylo dheer, muusiga dheer iyo heesida lama oggola inta u dhexaysa 10:00 habeenimo-07:00 subaxnimo. Macquul ahaan muusiga dheer ee la daaro dhacdooyinka qoyska waa la oggolyahay goor dambe oo cawayska ah, laakiin xaalada sidan jaarka waa in lagu wargeliyaa dhacdada mar hore.
2. Kiraystayaashu waxay masuul ka yihiin wax ku biirinta tayada guud ee nololsha aaga oo waa inay ka fekeraan xuquuqaha kiraystayaasha kale si ay u xiiseeyaan nolol nabad leh.
3. Kiraystaha sidoo kale waxa uu ka masuul yahay dhaqanka martidiisa/keeda!

B. Aagaga dadka ka dhexeeya

1. Isticmaalka qolka dhar maydhka lama oggola muddada 10:00 habeenimo- 08:00 subaxnimo. Qolka dhar maydhka iyo qolka qalajinta waa in loo isticmaalaa si waafaqsan jadwalka sii qabsashada. Isticmaalaha qolka dhar maydhka waa inuu nadiifiyaa qolka isticmaalka ka dib, markaas qofka ku xiga ee jadwalka leh waxa uu awood u yeelanayaa inuu bilaabo isticmaalka qolka dhar maydhka.
2. goobta xamaamka kulul ee la wadaago waxaa la heli karaa si loo isticmaalo Jimcayaasha iyo Sabtiyada ilaa 10:00 habeenimo.
3. Albaabada aagaga guud waa in had iyo jeer ay qufulnaadaan. Dhacdada uu qof ka tago albaabka oo furan, qofkaas ayaa ka masuul ah aaga.
4. Sigaar cabbista, meeraysiga iyo buuqa lama oggola aagaga dadka ka dhexeeya.
5. Kaydka baaskiilka iyo walxaha kale lama oggola goobaha la qoondeeyay.

C Aagaga dibada

1. Qashinka guriga iyo xashiishka waa in loo qaadaa daasadaha lagu urursho. Sharciyada dib u warshadaynta qashin ayaa la raacayaa.
2. Kiraystayaasha ayaa ka masuul ah abaabulka soo qubista qashinka kale (qashinka khatarta ah, kuraata gabowday iwm,).
3. Baabuurta waxaa la dhigtaa meelaha gaadhi dhigashada dedan ee loo qoondeeyay ama meelaha kulayliska.
4. baabuur dhigashada marinada ama xaga hore ee dhismaha lama oggola (keliya waxaa la oggol yahay baabuur dhigashada ku meel gaadhka ah iyo ka dejinta rarka). Wadista baabuurka ee aaga dibada iyo marinka lama oggola.
5. Meesha baabuurta la dhigto ee baabuurka qoyska ee labbaad waa in si ka gaar la isula aqbalaa maareeyaha dhismah ama kormeeraha.
6. Dhigista is jiidka, doonyaha, baabuurta la dhex dego, aagaga dibada ama meesha baabuurta la dhigto lama oggola, laga reebo rarista iyo ka dejinta.

7. Dharka la maydho waa in lagu qalajiyaa aaga loo qoondeeyay.
8. Rooga iyo go'yaasha sariirta waxaa boodhka lagaga tumaa meesha loo qoondeeyay.
9. Xawayaanka rabaayada ah waa in xadhig lagu wadaa gudaha guriga oo waa in aanay sababin rabshad ama aanay ka qayb qaadan nadaafada dhismaha ama deegaanka. Xawayaanka rabaayada ah looma oggola aaga ciyaarta ee carruurta.

D. Guriga dabaqa ah

1. Kiraystaha waxa uu si buuxda uga masuul yahay beddelka daaqada, godadka gidaarada iyo albaabada iyo waxyeelooyinka kale.
2. Kiraystahu waxa uu si buuxda uga masuul yahay waxyeelada ay sababaan xawayaanka rabaayada ah.
3. Haddii ay jiraan yaraan ama si xun u shaqayn biyaha ama beebka qaada, waayirka korontada, qasabadaha, gododka korontada ama walxo kale oola mid ah, kiraystaha waa inuuka warbixiyaa maareeyaha dhismaha ama kormeeraha isagoon ka daahin.
4. ka daarista dab baxaya balakoonka lama oggola. Wax ku dubashada balakoonka dhismaha la degenyahay waxaa keliya oo la oggolyahay DUBASHADA KORONTADDA AH (isticmaalka gaasta ama duxusha wax lagu dubo lama oggola).
5. Sigaar cabbista lama oggola gudaha guriga. Dhacdada aad sigaar ku cabto balakooka ama barxada fadlan ka feker jaarkaaga.

E. Xad gudubka sharciyada

1. Dhacdada xad gudubka ee shuruucda, dembiilaha waxaa ugu horayn loo soo saari doonaa digniin qoran.
2. Haddii xad gudubku sii socdo, mulkiilaha waxa uu miciinsan doonaa tallaabo sharci ah, magdhowga waxyeelooyinka iyo ama joojinta kirada.